

Dhagaysiga Kahor:

1. Kala xidhiidh wakaalada go'aan qaadashada oo ka codso dhammaan dhokomentiyada, macluumaadka markhaatiga iyo wixii sharci ku salaysan ee wakaaldu kuu tirsanayso dhagaysiga.
2. Ururi dhammaan qorshayaasha adeega (Qorshaha Adeega Qof Ahaaneed [ISP], ISP soo-raaca, Qorshaha Adeega Bulshada [CSP], qorshaha caafimaadka iyo badbaadada, iwm..).
3. Ururi dhammaan dhokomentiyada muhiimka ah (qorshaha waxbarashada, qorshaha daaweynta, qorshaha caafimaadka iyo qiimaynta, iwm..).
4. Diyaari markhatiyaashaada. Hubi inaad ku darto macmiilka maareeyihiisa degmada. Markhaatiyaashu waa inay sheegi karaan sababta ay adeegyadani daruuri u yihiin iyo sida goysamada la soo-jeediyey wax ugu dhimayso caafimaadka, badbaadada iyo daryeelka macmiilka.
5. Diyaari dacwadaada – culayska saar faahfaahinta jadwalka macmiilka iyo baahida iyo weliba cabsida haddii goysmada la hirgeliyo.
6. Diyaari baqshada ay ku jiraan dhammaan caddaymaha muhiimka iyo qoraal kooban ee gundhiga, arrimaha iyo waxaad ku raadinayso racfaankan. Nuqulo uga samee dhammaan dadka ay khusayso oo idil.
7. Sii baro waxaad ku hadlayso dhagaysiga.

Macluumaadka Macmiilka (Adeeg Helaha):

1. Ururi macmiilka ISP, CSP, dhokomentiyada baaritaanka, qorshaha caafimaadka iyo badbaadada, iyo/ama qorshaha maaraynta halista.
2. Dhokomentiyadaasi ma faahfaahinayaan baahiyaha macmiilka?
3. Maareeyaha kiiska ee macmiilku diyaar ma u yahay inuu qiro in dhokomentiyaashu cusub yihiin oo si haboon uga tarjumayaan baahiyaha macmiilka?
4. Maxay dhab ahaan tahay goysmada la soo-jeediyey ee dhibta ku keentay macmiilku?
 - Sidee ayey goysmadu u saamaynaysaa macmiilka?
 - Sidee ayey goysmadu u saamaynaysaa qoyska macmiilka iyo/ama xaalada nololeed?
 - Sidee ayey u saamaynaysaa caafimaadka, badbaadada iyo daryeelka macmiilka?
 - Goysmadu miyey waxyeelaynaysaa caafimaadka, badbaadada iyo daryeelka macmiilka? Haddii ay jirto, sidee?
5. Miyey jirtaa suurtaglnimo inuu macmiilku ka tago gurigiisa ama bulshada oo u guuro meel xadidan goysmada awgeed?

Wixii macluumaad dheeraad ama adeegyo u-doodid ah, kala xiriir Arc Greater Twin Cities 952-920-0855 ama booqo www.arcgreatertwincities.org.